**Please print the letter below and photocopy onto school letterhead before distribution**

Warqadda Waalidiinta oo ku saabsan munaasabadahii bulshada ee dhawaa
Letter to parents regarding recent community events

Waalidka/Daryeelaha Sharafta leh

Ayadoo la raacayo munaasabadihii bulshada ee dhawaa, dugsigaagu wuxuu maanta qaaday tallaabooyinka soo socda:

Ardayda waxaa loo sheegay inuu dugsigu u sii ahaan doono beya'd ammaan u ah dadkoo dhan. Ardayda waxaa la xusuusiyey qawaaniinta khusaysa daryeelka ardayda iyo qorsheyaasha takoor-diidka ah taas oo u hubsiinaysa in la taageeri doono haddii ay la kulmaan wax kadeed shaqsiyeed ah.

Ardayda waxaa la siiyey fursadda ay uga hadlan dareenkooda waxaana la xusuusiyey inay la xiriiri karaan la-taliyaha dugsiga ama shaqaalaha kale ee dugsiga haddii ay ka walwalsan yihiin ama caraysan yihiin. Taageero joogta ah ayaa la siin doonaa arday walba oo u baahan.

Waxay noqon kartaa mid waxtar leh haddii aad kala hadasho carruurtaada wax ku saabsan munaasabadahan aadna ku dhiirigeliso inay noqdaan kuwo dulqaad leh iyo danaynta dadka oo dhan, xagga dugsiga iyo bulsha weyntaba.

Yeelashada howl-maalmeedyada caadiga ah iyo xiisaha guriga waa mid caawimaad u leh carruurta kuwaas oo la tacaalaya xaaladaha adag.

Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad qabto wax welwel ah oo gaar ah ilmahaaga markaasna caawimaad ayaa lagu siin doonaa sida ugu dhaqsaha badan.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan inuu kaa caawiyo si aad ula xiriirto dugsiga, fadlan ka wac Adeega Turjumaada Taleefanka 131 450, weydiiso turjumaan luqaddaada ku hadla. Xiriiriyaha ayaa khadka soo galin doona turjumaan kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Mahadsanid

Maamulaha (Principal)